

Codsiga/Cusboonaysiinta Shatiga Tafaariqda Tubaakada

- Shati Cusub – Taariikhda Furitaanka: _____/_____/_____
Bisha Maalinta Sanadka
- Cusbooneysiinta Shatiga – Taariikhda: _____/_____/_____
Bisha Maalinta Sanadka
- Ganacsiga Jiray, Milkiilaha Cusub – Taariikhda Dhaqangalka: _____/_____/_____
*Cadeynta badelka milkiilonimada waa loo baahanyahay Bisha Maalinta Sanadka

Office use only (U gaara shaqaalaha xafiiska oo kaliya):

Facility # (Xarunta #): _____

Sanadka (Fadlan daabac ama qor)

- Magaca Ganacsiga: _____
- Ma beddeshay magaca Ganacsiga? Haa Maya
- Email-ka Ganacsiga: _____ Lambarka Dukaanka #: _____
- Cinwaanka Website-ka Ganacsiga: _____ Telefoonka Ganacsiga: _____
- Maalmaha iyo Saacadaha Shaqada: _____
- Cinwaanka Sadarka 1: _____
- Cinwaanka Sadarka 2: _____
- Magaalada: _____ Gobolka: _____ Zip-ka: _____
- Isugeynta Tubaakada Sanadkii la Gado: \$0–\$100,000 \$100,001–\$249,000 \$250,000–\$399,999 \$400,000–\$699,000
 \$700,000 iyo ka badan
- Tirada Shaqaalaha: 1-4 5-9 10-24 25-99 100-249 250+
- Ganacsigani ma ku xadgudbay sharciga u yaala ganacsiga tubaakada? Haa Maya

Nooca Ganacsiga (Tilmaan dhamaan kuwa ku khuseeya)

- Baar/Makhaayad Dukaan Wax Lagu Gado Kaalin Shidaal Dukaanka Laga Adeegto Tukaan Khamriga Gada
 Farmashiye Dukaan Tubaakada Gada Dukaan Gada Waxyaalaha La Nuugo Kuwo kale: _____

Waxyaalaha Lagu Gado (Tilmaan dhamaan kuwa ku khuseeya)

- Sigaarka Sigaarka Yaryar Sigaarka Waaweyn Tubaakada Aan Qiiqa Lahayn Tubaakada Caadiga ah
 Tubaakada La Duubo Sigaarka Elektarooniga Ah (E-cigarettes)/Nikotiinta Waxyaalaha La Nuugo
 Badeecada ama Shiishada Waxyaalo Kale: _____

Mulkiilaha Ganacsiga Leh

- Magaca Hore: _____ Magaca Dhexe: _____ Magaca Dambe: _____
- Magaca Urrurka: _____ Telefoonka Ganacsiga: _____
- Cinwaanka Sadarka 1: _____ Telefoonka Gacanta: _____
- Cinwaanka Sadarka 2: _____
- Magaalada: _____ Gobolka: _____ Zip-ka: _____
- Email-ka: _____ Habka La Doorbidayo In La Iskula Soo Xiriiro: _____

Fadlan buuxi qeybta xigta si aad ugu caawisid Gobolka Multnomah County inay u adeego bulshada tafaariqda.

- Luuqada Aad Doorbiday: Ingiriisi Korean Chinese Af-Ruushka Soomaali Isbaanish Vietnamese
 Kuwo kale: _____

Luuqada Ay Doorbidayaan Shaqaalahaaga (Calaamadeey dhammaan kuwa khuseeya shaqaalaha hadda jooga):

- Ingiriisi Korean Chinese Af-Ruushka Soomaali Isbaanish Vietnamese
 Kuwo kale: _____

Waa maxay jinsiyaddaada ama asalkaagu? Calaamaddey sanduuqyada u badan sida ku haboon.

- Afrikaan ah Laatiino/Hisbaanik U dhashay Hawaii ama Jasiiraddaha Baasifiga Madow/Maraykanka Madow ah
 Slavic Aasiyaan Bariga Dhexe Hindida Dhaladka Maraykanka ama Dhaladka Alaska Caddaan ah
 Ma rabo in aan ka jawaabo Kuwo kale: _____

Qofka Arjiga Codsanaya Wuxuu la mid yahay Mulkiilaha Ganacsiga Leh

Magaca Hore: _____ Magaca Dhexe: _____ Magaca Dambe: _____
 Magaca Urrurka: _____ Telefoonka Ganacsiga: _____
 Cinwaanka Sadarka 1: _____ Telefoonka Gacanta: _____
 Cinwaanka Sadarka 2: _____
 Magaalada: _____ Gobolka: _____ Zip-ka: _____
 Email-ka: _____ Habka La Doorbidayo In La Iskula Soo Xiriiro: _____

Xiriirka Biilka Wuxuu la mid yahay Mulkiilaha Ganacsiga Leh

Magaca Hore: _____ Magaca Dhexe: _____ Magaca Dambe: _____
 Magaca Urrurka: _____ Telefoonka Ganacsiga: _____
 Cinwaanka Sadarka 1: _____ Telefoonka Gacanta: _____
 Cinwaanka Sadarka 2: _____
 Magaalada: _____ Gobolka: _____ Zip-ka: _____
 Email-ka: _____ Habka La Doorbidayo In La Iskula Soo Xiriiro: _____

Caddayn

Arji kasta oo loogu tala galay Ruqsadda Ganacsiga Tubaakada waa in ay la socotaa caddayn saxiixan oo ah in Mulkiilaha Ganacsiga leh lala socodsiiyay sharciyada Ruqsadda Ganacsiga Tubaakada iyadoo la raacayo Xeerka Degaanka Multnomah Qaybta 21.560 ilaa 21.568. Caddayn saxiixan ayaa looga baahan yahay meel kasta oo waxyaalaha la xiriira tubaakada laga dhigo in ganacsi ahaan loo gado ama la isdhaafsado. Waa mas'uuliyadda Mulkiilaha Ganacsiga leh in uu xaqiijyo in dhammaan shaqaalaha iyo dadka ganacsiga ka shaqeeya ee gada waxyaalaha la xiriira tubaakadu in ay u hoggaansamaan dhammaan sharciyada federaalka, gobolka iyo degaanka ee u yaala ka ganacsiga tubaakada ee ku saabsan ruqsadda. Waxyaalo loogu tala galay dhanka waxbarashada oo la xiriira sharciyada federaalka, gobolka iyo degaanka ee u yaala ka ganacsiga tubaakada ayaa la bixiyay isagoo la socda arjigan si aad macluumaad uga hesho.

Aniga oo ah, (Daabac magaca buuxa ee Mulkiilaha Ganacsiga leh) _____, waxaa la ila socodsiiyay sharciyada tubaakada u yaala ee saamaynaya Ruqsadda Ganacsiga Tubaakada ee Degaanka Multnomah iyo aniga oo tababar siin doona dhammaan shaqaalaha gada waxyaalaha la xiriira tubaakada sida ay dhigayaan sharciyadani.

Saxiixa Mulkiilaha Ganacsiga leh

Taariikhda

Si aad u Gudbisid Codsiga iyo \$683 Qidmada Shatiga

(Codsiga dhameystiran iyo lacag bixin ayaa looga baahanyahay si looga baarandago codsigaaga)

Boos ahaan: Soo dir arji buuxa oo uu la socdo jeeg ama lacagta (money order) oo dhan \$683 kuna soo hagaaji: Tobacco Control and Prevention Program, ATTN: TRL, 847 NE 19th Ave, Ste 350, Portland OR 97232.

Jeega waxaa la siin karaa: Gobolka Multnomah

*Saacadaha shaqada ee xafiska: Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo - 5:00 galabnimo. Wuu xiran yahay dhammaan fasaxyada muhiimka ah.

Su'aalaha: Fadlan nala soo xiriir 503-988-4163 ama lth.tobacco.prevention@multco.us.

Waxyaalo ay tahay in laga ogaado gadida tubaakada iyo waxyaalaha la xiriira nikotiinta (nicotine) ee Degaanka Multnomah.

Sharcigan, waxyaalaha la xiriira tubaakada waxaa lagu qeexaa in uu yahay wixii maadooyin ah ee ka kooban, ka samaysan ama ka soo jeeda tubaakada loogu tala galay in dadku isticmaalo, kuwaasi oo ay ka mid yihiin balse aanay ku koobnayn: sigaarka caadiga ah, sigaarka waaweyn, sigaarka yaryar, tubaakada beebka, shiishada, ta sanko laga qaato buuriga, tubaakada la calaliyo 'bidis', iwm; sigaarka elektarooniga ah ama wixii waxyaalo la neefsado ka kooban ama gudbinta nikotiinta; dareeraha la nuugo, dareeraha elektarooniga ah, ama wixii dareere ah ee kale ee kama koobnn nikotiinta loogu tala galay in dadku isticmaalo. Tani kuma jiraan waxyaalaha la xiriira nikotiinta ee FDA ogolaatay ee loogu tala galay joojinta tubaakada, sida nikotiinta balastar ah ee la isku dhejiyo, xanjada ah ama 'ta la muudmuudsado'.

Tubaakada ka gad kaliya dadka da'doodu tahay 21 jir ama ka weyn tahay. Waxaad xaqiijisaa in dadka macaamiisha ah ee u muuqda in ay da'doodu ka yar tahay 27 jir aad weydiiso Aqoonsi sidoo kalena aad si taxadar leh u firiso taariikhda dhalasho.

(CFR § 1140.14(a)) (ORS 431A.175) (MCC § 21.563)

Wixii la xiriira Ruqsadaada Ganacsiga Tubaakada

Dhammaan goobaha lagu gado waxyaalaha la xiriira tubaakadu waa in ay haystaan Ruqsada Ganacsiga Tubaakada sanadlaha ah oo sax ah, oo ay bixiyeen Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah, Adeegyada Caaafimaadka Deegaanka, Barnaamijka Xakamaynta iyo Ka hortagga Tubaakada, laga bilaabo Luulyo 1, 2016-ka. (MCC § 21.561)

Degaanka Multnomah waxay bixin doonaan ruqsad warqad ka samaysan oo ay tahay in lagu soo bandhigo goobtaada, taasi oo ay si fudud u arki karaan macaamiishu. (MCC § 21.561)

Dhammaan goobaha kala duwan waa in soo bandhigaan calaamada loo baahan tahay (oo ay la socoto ruqsadda la bixiyay) sida uu dhigayo Sharciga Gobolka Oregon ee tilmaamaya in ay sharci darro tahay in tubaakada ama waxyaalaha la neefsado laga gado dadka ay da'doodu ka yar tahay 21 jir. (ORS 431A.175)

Baakadaynta

Waxyaalaha la Xiriira Tubaakada sida kor ku qeexan waa in la gadaa iyadoo ku jirta baakadii asalka ahayd oo ay la socdaan digniino caafimaad. Sigaarka waa in la gadaa isagoo ku jira baakado ay ku jiraan 20 xabo. Waxyaalaha la xiriira tubaakada lama furi karo si hal xabo markiiba loo gado (oo sidoo kale loo yaqaan "loosies") ama buuriga marada khafiifka ah ku duuban "snus pouches". (MCC § 21.563) (CFR § 1140.16(b)) (CFR § 1140.14(2d)) (ORS 431A.175)

Waxyaalaha la neefsado waa in baakad lagu ridaa oo uu lahaadaa calaamad wax ku qoran yihiin sida sharcigu dhigayo. (ORS 431A.175)

Halka wax lagu Gadayo

Waxyaalaha la xiriira tubaakada oo dhan waxaad dhigtaa mafrashka dabadiisa meel ay kaliya geli karaan shaqaalaha/mulkiilayaashu ama ku rid sanduuq xiran. (ORS 167.765)

Gadida waxyaalaha la xiriira tubaakada ee lagu gadayo mishiinida alaabta laga iibsado “vending machines” waxaa loo ogol yahay oo kaliya xarumaha ay mamnuuca ka yihiin dadka da’doodu ka yar tahay 21 jir. (ORS 167.780)

Dhiirigelinta

Waa sharci darro in la gado sigaarka dhadhanka leh marka laga reebo ka samaysan “menthol ama sigaarka ay ku qoran tahay calaamada “light,” “low tar,” ama “mild.”

(21 US Code § 387g) (Section 911(b)(2)(A)(ii) of the Federal Food, Drug, and Cosmetic Act)

Waa sharci darro in hadiyad la bixiyo ama waxyaabo kale marka la gadanayo waxyaalaha la xiriira tubaakada. (CFR § 1140.34(b))

Muunadaha waxyaalaha la xiriira tubaakada waa sharci darro marka laga reebo goobaha ay ka reeban yihiin dadka da’doodu ka yar tahay 21 jir.

(21 US Code § 387 a-1(a)(2)(G)) (ORS 180.486)(431A.175)

La shaqaynta Degaanka Multnomah

Ganacsatada gada tubaakada waa in ay ogolaansho ay ku soo gelayaan siiyaan kormeerayaasha Degaanka Multnomah si ay u sameeyaan kormeerka iyo baaritaanka sanadlaha ahaa.

(MC TRL Rules § H.2.a)

Ganacsatada gada tubaakadu waa in ay wada shaqayn ka sameeyaan qorshaynta dhaqancelinta.

(MC TRL Rules § H.2.b.i)

Ruqsada ganacsiga tubaakada maaha mid la wareejin karo. Haddii ay noqoto in uu guuro ganacsigaaga Degaanka Multnomah dhexdiisa, waa in aad heshaa ruqsad cusub si aad goobta cusub ugu gado waxyaalaha la xiriira tubaakada. Haddii ganacsi ruqsad leh la gado ama la warejiyo, mulkiilaha cusub waa in uu ruqsad cusub u helaa goobtaasi ka hor intaanu gadin waxyaalaha la xiriira tubaakada.

Haddii aad hayso su’aalo dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir: 503-988-4163 ama hlth.tobacco.prevention@multco.us